



Marwo Ramona Tyson, Kormeeraha guud

Marwo Marshall D. Orson, Guddoonka Guddiga
 Marwo Vickie B. Turner, Guddoon Ku xigeenka
 Mudane Stan O. Jester
 Dhaqtar Michael A. Erwin
 Marwo Allyson Gevertz
 Mudane Dijon DaCosta
 Dhaqtar Joyce Morley

Xiriirka Warbaahinta:

Chris Glazier

chris.glazier@porternovelli.com

770-743-9509

Portia Kirkland

Agaasimaha Ku meelgaarka Isgaarsiinada

portia_kirkland@dekalbschoolsga.org

678-427-4898

Wixii Siideynta Degdega

Juun 18, 2020

Guddiga Waxbarashada Gobolka DeKalb wuxuu Ansixiyay in Kormeeraha guud kula heshiiyo Cheryl Watson-Harris

Watson-Harris inuu bilaabo doorka kormeeraha guud ka bilow Luuliyo 1

STONE MOUNTAIN, Ga. — Guddiga Waxbarashada Gobolka DeKalb waxay maanta si rasmi ah ugu dhawaaqeen doorashadooda Cheryl Watson-Harris sida kormeeraha guud ee xiggo ee Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb (DCSD).

Guddiga wuxuu u codeeyay (6 – 1) inuu u magacaabo Watson-Harris, tartamaha soo baxay kaliya ee Degmada, sida kormeeraha guud oo fulliyo heshiiska shaqada sadex-sanno ah oo ay la jirto mushaarka sannadlaha ku saleysan oo ah \$325,000. Waxay bilaabeysaa doorka xiliga Luuliyo 1.

“Waan ku faraxsannahay oo aan ku faanaa inaan si rasmi ah ugu soo dhaweyno Marwo Watson-Harris Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb sida kormeeraheena guud ee xiggo,” waxaa dhahay Guddoonka Guddiga Marshall Orson. “Waaya aragnimadeeda sida labadaba sida soo jeediyaha wax cusub ee Waaxda Waxbarashada Caasimada New York iyo horyaal dareen xoogan leh oo carruurta waa sida hufan waxa aan ugu baahannahay inaan ku sii joogteyno ku qaabeynta ardeydeena guul.”

Watson-Harris waxaa lagu magacaabay tartamaha soo baxay ee raadinta guddiga oo kormeeraha guud ee cusub oo Juun 4. Inta lagu jiray 14 kii maalmood ee la soo dhaafay, muddada sugitaanka ee looga baahan yahay sharciga Georgia kadib ku dhawaaqida tartamaha ugu dambeeyo ee kormeeraha guud, Watson-Harris waxay kala qeybqaadatay kulanka onleenka shaqaalaha, xubnaha bulshada, saraakiisha bulshada iyo warbaahinta. Inta lagu jiray isdhaxgaladaan, waxay ka hadashay waaya aragnimadeeda, qaabka shaqada iyo hamidalada Degmada iyada oo wax badan laga baranayo filashooyinka bulshada iyo mudnaanada DCSD.

“Dareenka bulshada oo guusha ardayga waxaa loogu arkay mid la taaban karo kulan walba ee aan galay, oo waxaan rabaa inaan u mahadceliyo qof walba oo igala qeybqaatay. Waxaan rabaa inaan kuwa badan oo idinka ah idin kula kulmo qof ahaan sida ugu dhaqsiiyaha badan oo xaaladaha ogolaato,” Watson-Harris ayaa yiri. “Waa dhiirogelin in la arko taageero badan oo shaqada muhiimka ah ee naga horeyso, oo waan ku faraxsannahay inaan bilaabay.”

Hogaan dhameystiran ee waxbarashada ah, Watson-Harris waxay keeneysaa waaya aragnimo badan oo doorarkeeda ee New York iyo Boston. Waxay hadeer u adeegtaa sida Ku xigeenka Koowaad ee Madaxa, Agaasime Sare ee Taageerada Goobta iyo Agaasimaha Fullinta Brooklyn oo Waaxda Waxbarashada Caasimada New York. Horaantii waxay u adeegtay sida Koreemaha guud ee Shabakada iyo maamulaha Dugsiyada Bulshada Boston (BPS). Waa qofka ugu da'da yar ee abid loo magacaabo booska maamulaha ee BPS.

Watson-Harris waxay ka haysataa digriiga waxbarashada Kulliyada Marymount iyo digriiga mastarka ee waxbarashada ee Jaamacada Harvard. Hadeer waxay musharax dhoktaral ah ka tahay Dugsiga New York University's Steinhardt oo taariiqda dhameystirka la filanayo ay tahay 2021 oo digriiga hogaannimada iyo hal abuurka waxbarashada.

Watson-Harris waxay badeleysaa Ramona Tyson, kaas oo u adeegay sida kormeeraah ku meelgaarka ah tan iyo Nofeembar 2019. Tyson waxay hogaamisay dugsiga degmada inta lagu jiray cudurka safmarka ee COVID-19 oo dib u mudnaan siisay masuuliyadaha miisaaniyada ururka oo fullisay isbadelo lagu nasinayo dugsiyada buuxdhaafay. Sodon sanno kadib oo adeeg aan caadi aheyn ee DCSD, waxay ka fariisaneysaa Juun 30.

Wixii warbixin dheeraad ah oo Watson-Harris iyo nidaamka raadinta kormeeraha guud, booqo bogga raadinta kormeeraha guud ee [websaydka DCSD](#) oo raac [boggaga](#), [Facebook](#) [Twitter](#) [Instagram](#) ee Degmada.

###

INAGA NAGU SAABSAN: Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb waxay isticmaalaan Waxbarida Qotodadheer iyo Barashada lagu diyaarinayo ardaydooda ka badan 102,000 oo kulliyada iyo shaqooyinka. Waxbarida Qotodadheer iyo Barashada waxay ka qeybgelisaa ardayda inay u fakaraan si adag, xaliyaan dhibaatooyinka, si wax ku ool ah u xiriiraan oo uga wada shaqeeyaan inay ku guuleystaan kulliyada, shaqada iyo nololaha. Si aad wax badan uga baratid, booqo www.dekalbschoolsga.org. Ku gudbi su'aalaha ama faalooyinka Communications@dekalbschoolsga.org.